Xarunta
QM ee
Deegaama
ynta
Aadamaha

# Xubinta Golaha Deegaanku

# Marka uu yahay Gorgoriye

## Tilmaame-baraha 7aad

## Tababarka Hoggaanka La Doortay

**Tarjumaddii: Jaamacadda Camuud**

**Istanbul, 1996kii Shir Madaxeedkii Magaalada"**

X/dhibaanka
Deegaanku
Markuu
Yahay
Gorgoriye

Taxanaha
Agabka
Tababarka

**Sawirada waxaa Iska Leh Joel Elrod**

**Naqshadaha iyo Jaan goyntana Vicki Gillette**

**HS/713/04SO**

**X/dhibaanka Deegaanku Markuu Yahay Gorgoriye**

**Tababarka Hogaanka La Doortay**

## HORDHAC

Sida ay muujisay natiijooyinka qiimaynta baahiyaha tababarka ee ay qabatay Xarunta QM ee Deegaamaynta Aadanaha (Habitat), baahiyaha tababarka ee khuseeya xubnaha golaha deegaanka la soo doortay ee Dowladaha Hoose ama siyaasiyiinta heer degmo, waxaa loo arkaa inay ku jiraan arrimaha caalam ahaan ugu muhiimsan, isla markaana, ugu danaynta yar dhinacyada dhismaha wax-qabadka ee horumarka Dowladaha Hoose iyo maamulkooda.
Sannadihii ugu danbeeyey, tiro dalal kala duwan ah, sida Nepal iyo Polland ama Uganda iyo Paruguay ayaa markii ugu horreysay muddo tobannaan sano ah qaatay nidaamka ay ku dooranayaan xubnaha golaha deegaanka iyo gudoomiyaasha/ maayarada halka meelaha qaarna weligood aysan dooran. Baahiyaha tababarka ee madaxda la soo doorto ee Dawladda Hoose waxay xagga sare ugaga jiraan ajendaha dimoqraadiyadaha Dowladaha hoosa ee cagaha loo taagay/dhismay, sida Ecuador, India iyo dalka Marykanka (USA).
Si wax looga qabto baahiyahan, Xarunta QM ee Deegaamaynta Aadanaha (HABITAT) waxay samaysay oo ay tijaabisay taxanayaal buugaag Tilmaame-barayaal ah oo tababarka ku lug leh si ay uga taageeraan Xubnaha Golaha Degaanka in ay matalaan muwaadiniinta, siiyaan hoggaaminta loo baahan yahay magaalo iyo dad ahaanba, si hawl-karnimo leh ula shaqeeyaan Dawladda Dhexe iyo maamulka, farsamo-yaqaannada iyo xirfadlayaasha sare ee shaqaalaha Dawladda Hoose iyo hay'adaha la hal-maala. Tilmaame-barayaashani waxay soo koobayaan siyaasad iyo go'aan-qaadasho, xiriirka, gorgortan iyo hoggaamin, ka-qayb-gelidda, agaasinka iyo hagidda shiraraka, xilalka karti-gelineed iyo fududeyneed ee xubinta Golaha Degaanka, maamulka maaliyadeed iyo arrimaha kale ee la hal-maala.
Tilmaame-barahan, Xubinta Golaha Degaanku markuu yahay Gorgoriye, wuxu ka mid yahay taxanayaal 12 ah, looguna talogalay, bilow ahaan, in ay adeegsadaan tababarayaasha hay'adaha tababarka qaranka ee Dawladda Hoose ama waaxaha tababarka ee ku dhex yaal Dowladaha Hoose. Si ay ugu noqoto taageero dheeraad ah tababarayaasha adeegsanaya Tilmaame-barayaashan, Xarunta QM ee Deegaamaynta Aadanuhu (HABITAT) waxa kale oo ay soo daabacday buug kale oo kaabaya ama wehel u ah taxanahan Tilmaame-barayaasha ah. Buuggan la yiraah "Tusaha Tababaraha ee Tababarka Saraakiisha la soo doorto" oo ka kooban qoraallo tababaraha khuseeya iyo macluumaadba, waxaa loogu talo-galay in tababaruhu uga faa'iidaysto qorshaynta aqoon-is-weydaarsiyada Saraakiisha la soo doortay ee ku salaysan Tilmaame-barayaashan.
Waxaa la filayaa in Tilmaame-barayaashani si weyn wax uga tari doonaan xoojinta dhismaha awoodda wax -qabad ee Dowladaha Hoose iyadoo la barayo ku dhaqanka hoggaaminta wacan, kuwaas oo ka mid ahaa ujeeddooyinkii waaweynaa ee 1996dii Shirweynihii Xarunta QM ee Deegaamaynta Aadanaha, Habitat II.
Waxaan u mahad-naqayaana Dr. Fred Fisher iyo Mudane David W.Tees kaalintii ay ka qaateen diyaarinta Tilmaame-barayaashan iyo kuwo kale oo ku jira taxanayaashan, iyaga oo la kaashaday shaqaalaha Xarunta QM ee Deegaamaynta Aadanaha (HABITAT) Qaybta Tababrka ee ka tirsan isla Xaruntaa QM oo ay taageero u fidisay Dawladda Netherlands. Waxa kale oo aan rabaa in aan xuso talooyinkii iyo tilmaamihii ay ku darsadeen Tabarayaasha iyo madaxda Dawladda Hoose ee Costa Rica, El Salvador, Kenya, Lithuania, Romania iyo Uganda ee naga caawiyay tijaabintii goobeed ee Tilmaame-barayaashan.

Dr. Wally N'Dow

Kaaliyaha Xoghayaha -Guud

Xarunta Qaramada Midoobay ee Deegaamaynta Aadanaha (Habitat)

# AQOONSI

Tarjumidda iyo habeynta af Soomaaliga ah ee Tilmaame-barayaasha Hoggaanka la soo doortay waxay ku hirgashay Barnaamajka Is-maamulka Fiican iyo Tababarka Hoggaanka la soo doortay ee ay maal-gelisay EU-da, isla markaana uu fuliyay Xafiis Goboleedka UN-HABITAT ee Afrika.

Tarjumidda iyo habeynta Af-Soomaaliga ah ee Tilmaame-barayaashan Tababarka Hoggaanka la soo doortay, waxaa ka hawl-galay koox tarjumidda ku xeel dheer oo ka tirsan: Akaademiyadda Nabadda iyo Horumarka, Jaamacadda Hargeysa iyo Jaamacadda Cammuud; iyaga oo ay ka caawisay Hay'adda QM ee HABITAT, laanteeda Hargeysa ku taal.

Mahad-naq gaar ah waxaa mudan Akaademiyadda Nabadda iyo Horumarka oo ka hawl-gashay tifaf-tirka iyo isu-ekeysiinta Tilmaame-barayaashan.

Waxaa kale oo mahad-naq mudan Jacfar Maxamed Gaaddaweyne oo Akaademiyadda Nabadda iyo Horumarka ee Somaliland ka tirsan, Maxamed Muumin oo Jaamacadda Bariga Afrika ee Puntland ka tirsan iyo Maxamed Afrax oo Xarunta Cilmi-baarista iyo Dood-wadaagga ee Koonfurta-Dhexe ee Soomaaliya ka tirsan, kuwaas oo wada diyaariyay tarjumidda ereyada Ingiriisiga ah ee Tilmaame-barayaashan ku jira.

Mahad-naq gaar ah waxa isna mudan Maciej Sudra oo diyaariyay astaamaha iyo naqshadaha jaldiyada Tilmaame-barayaashan.

Nuqulkan ugu danbeeya waxaa dib u eegis iyo dib u sixid ku sameeyay Khuburo ay wakiilatay Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta ee Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Hay'adda UN-Habitat Xafiiskeeda Muqdisho. Dib- u eegistan waxaa la sameeyay Oktoobar, 2018-kii.

**X/dhibaanka Deegaanku Markuu Yahay Gorgoriye**

**Tababarka Hogaanka La Doortay**

## HALKA UU KAGA JIRO TILMAAME-BARAHAN

**X/dhibaanka Deegaanku Markuu Yahay Gorgoriye**

**Tababarka Hogaanka La Doortay**

Bogga


Sida loo isticimaalayo buugagan 1

**Qaybta 1aad:**

Qormada Xubinta Golaha Deegaanku Marka uu Yahay Gorgoriye
Qeexid 3
Soo-ururin 4
Milicsi 4
Aragtiyaha iyo fikradaha 4
Gorgortan labada dhinacba guul u ah 5
Aragti xeel-dheer 6
Milicsi 7
Muxuu gorgortanku mihiim ugu yahay Dowladda Hoose 7
Xaq-dhawr kala duwanaanta 8
Dhaqammada 9
Milicsi 10
Sidee baad gorgortanka ugu guuleysan kartaa 11
Gogortan anshax leh 11
Maxaad dhab ahaan rabtaa? 12
Haku dhaqaaqin mawqifyadada lakiin ogsonow waxa yihiin 14
Xifadaha gogotanka : 14
Waa qaar ka mid ah saaxiibbada ugu fiican ee
Xubinta golaha deegaanku yeelan karo 16
Qodobo muhiim ah 17
Raad-raac

**Qaybta 2aad:**

7.1 layli diyaar-garaw ah: Xubinta golaha deeganku
marka u yahay gorgoriye 18
22
7.2 Soo bandhida tababaraha 24
7.3 jilid daraasad xaaladeed: Cagaf/Maldoosar laysku haysto 25
7.4 Layli: Luuqadda Wadahadalka 28
7.5 Door-jilid/daraasad xaaladeed: khilaaf u dhexeeya
bacadlaha iyo Golaha Deegaanka 32
7.6 Layliga xirfad gudbinta 35

## SIDA LOO ISTICMAALAYO TILMAAME-BARAAHAN

Tilmaame-barahan Tababarka ee xubinta golaha deeganku markuu yahay gorgoriye, sida Tilmaame-barayaashan kale ee taxanahan, waxa loo isticmali karaa siyaabo badan.

### Daraasad kuu gaar ah

Qormada Tilmaame-barahan ku bilaabmayso waxaa logu talo-galay in aad iska wax ugu baratid. Waxaa kale ee aad u baahan tahay waa meel deggan oo aad ku fikirtid, wakhti iyo warqado aad wax ku qortid. Si aad u hesho natiijooyinka ugu fiican, waxaana kuugu dhiirigelinaynaa in aad qorto jawabaha su'aalaha ka dhasha qormada. Qiimaha barashada ee akhristaha tubtan raaca ayaa laban-laabanta.

### Tababarka aqoon-iswaydaarsiga:

Qoraallada Tababarka iyo agabka layliga ee Tilmaame-barayaasha, waxa loogu talo-galay in ay adeegsadaan tababarayaasha waayo-aragga ah, marka ay wadaan aqoon-iswaydaarsiyada tababarrada ee xubnaha golaha deegaanka oo kala duwan. Agabka casharada iyo layliyada tababaraha ee buuggan loogu talo galay in ay isticmaalaan tababarayaasha waayo-araga ah ee aqoon iswaydaarsigan tababarka ah ee xubnaha golaha deegaanka oo kala duwan. Waxaa ku jira qaabab waxbarasho oo kala duwan iyo habab tababarayaashu  suura gelin kara in ay waaafajiyaan aqoon-iswaydaarsiga duruufaha u gaarka ah xubnaha golaha deegaanka.

Ujeedooyinka buuggan loo qoray waxay kugu dhiirigelinayaan in aad ku biiriso waayo-aragnimadada tababaranimo si aad sare ugu qaado agabyada tababarka ee xubnaha golaha deegaanka.

Tababarow waxaad dooran kartaa in aad sidiisa u raacdo agabka buuggan taxanaha ah u yaalo, hadiise aad ka doorbido waad kala hor-marsan kartaa ama waxbaad ka bedeli kartaa hadii loo baahdo si loo gaaro ujeedooyinka iyo xaaladaha u gaarka ah tababarka kasta, waxa aad dooran kartaa tababar saddex saacadood ah adigoo isticmalaya layliyadda buuggan, ama waxa aad ka faa'idaysan kartaa agabyad badan ee buuggan adigoo ku darsanaya waayo aragnimadada si aad uga dhigato tababar maali dhan socda.

Buuggan waxa uu ka mid yahay 12 buug oo taxane ah oo lagu tababaro hogaamiyayasha la soo doortay, waxa aad dooran kartaa ama lagaa codsan kara in aad qabato aqoon-iswaydaarsi kaaga baahan inaad isticmasho dhawr buug ama dhamaantood oo mudo dheer soconaaya, inkastoo buug kasta loo siticmali karo gaarkiisa. Iska markaasna wax-tarkooda iyo ka faa'idaysigooda waxa uu ka badan yahay marka taxanaha oo dhan ay qaataan xubnaha golaha deegaanka.

## Tababare-kooxeedka

Marka la helo tababare xirfad iyo waayo-aranimo leh, agabyadan waxa kale oo loo isticmalayaa si ay u kordhiyaan waxqabadka (performance) xubnaha meel ka wada shaqeeya marka la tababarayo. xubnaha meel ka wada shaqeeya, waxaa la rumaysan yahay tababarahu in uu hawlaha tababarada ee buuggan uu soo diyaariyo uuna habeeyo kuna daro wax dheeraad ah asagoo tixgelinaya duruufaha iyo sifooyinka kooxda la tababarayo, waxaa la rajeynayaa xaaladaha noocan ah in loo arko buuggan in uu yahay sanduuq agab (tool-kit) oo ay ku jiraan habab tababar oo kala duwan oo laysku barxi karo, lays waafajin karo, wax lagu dari karo lagana saari karo hadba sidii haboon.

Waxaa aad haysataa fursad aad ku kala dooranayso noocyada tababarada buuggan.

Waxaa lagu rajo weyn yahay in aad sida ugu fiican uga faa'idaysato

# QAYBTA 1AAD

# QORMADA

# Xubinta Golaha Deegaanku

# marka uu yahay Gorgoriye

**Qormo**

**X/dhibaanka Deegaanku Markuu Yahay Gorgoriye**

**Tababarka Hogaanka La Doortay**

## Qeexid

Xubinta Golaha Deeganka oo Gorgoriye ah (councilor in the rule of the negotiator), wuxuu dadka ka caawinayaa in ay wada gaaraan xal ay ku heshiis yihiin iyagoo danahooda iyo baahidooduba kala duwan yihiin.

## Soo- uruurin

Waxaan halkaan ku eegi doonaa kaalinta looga baahan yahay in uu hogaan la doortay ka qaato gorgortanka. Layskuma hawli doono dhinacyada rasmiga ah ee gorgortanka dhexmara shaqaalaha iyo maaraynta. Sababtuna waxay tahay iyadoo waddamadu ku kala duwan yihiin sharci-u-dejintooda iyo dhaqan-gelintooda. Hase ahaatee, waxaa lagu tilmaami doonaa sidii hawl-qabadkaagu wax-ku-ool u noqon lahaa, marka aad, adigoo Xubin Gole Deegaan ah, ciyaarayso doorka Gorgoriyaha.

## Milicsi

Marka aan iska fikiro anigoo gorgoriye ah, waxyaabaha soo socda ayaa igu soo dhaca.

1. ______________________________

   ______________________________

   ______________________________

   ______________________________

2. ______________________________

   ______________________________

   ______________________________

   ______________________________

3. ______________________________

   ______________________________

   ______________________________

**Qormo**

**X/dhibaanka Deegaanku Markuu Yahay Gorgoriye**

**Tababarka Hogaanka La Doortay**

## Aragtiyaha iyo Fikradaha

Gorgortanku waa arrin uu aduunka oo dhami ka siman yahay oo Aadanahu waligiiba ku soo dhaqmayay, taasi macnaheedu maha in gorgortan oo dhan isku mid yahay. Sida loo gorgortamayana waxay ku xiran tahay meesha la joogo, dhaqanka yaala iyo waxyaabaha laga wada hadlayo waxa ay yihiin. Waa kale oo ay ku xirantay cida wada xaajoonaysaa kuwa ay yihiin. Inkastoo mudo dheer loo haystay in gorgortanku gaar ahaan u khuseeyo cidaha ku hawlan diblomaasiyadda iyo xiriirada shaqaalaha oo kali ah, waxaa hada loo aqoonsan yahay in uu yahay qaab sharaf leh oo loo saari karo Isfahan-waaga iyo muran farabadan; waxaa ka mid ah is-maandhaafka ka dhasha ururrada gudahooda, qiimaha badeecadaha, bulshada isqabta, gumaysiga iyo gobanima-doonka gorgortanku waa geeddi-socod bulsho-siyaasadeed oo dhex mara laba dhinac iyo wax ka badan oo ku heshiiyay inay isku yimadaan si ay u soo wada saaraan go'aamo ay u wada diyaar yihiin fulintooda, xataa haddii si isku mid ah ugu wada qanacsanayn. Gorgortanku marka uu leeyahay go'aan qaadashada waxaa jira tilmaamo ka sooca kuwa sharciga ah. Tusaale ahaan wuxuu isagu leeyahay ujeeddooyin isku dhaf ah, dhanacyada gorgortamayaa waxay leeyihiin dano ay wadagaan iyo qaar ay kala leeyihiin (haddii aysan jirin dano ay wadaagan umay suurto gasheen inay gorortamaan mar hadday dhinacyadu ku heshiiyaan in ay gorgortamaan, ugu yaraan, waxay qaadan karaan hal hadafkaas guud)

Taasoo ay cidwalba dan ugu jirto in la heshiiyo, ayaa haddana waxaa laysla oggolyahay in dhinac walba danaynayo siduu sadbursiinada ugu badan uga heli lahaa waxa laysku hayo, ama waxaa geeddi-socodka gorgortanku tanaasulka waa inuu dhamaado ayadoo aanu gocasho badan ku reebin dadka miiska dhinaca kale ka fadhiya.

***Shumacaagu kama iftiin badanayo marka aad shumaca qofka kale damiso***

Labada dhinac ee is-hayaba gorgortanku waa u guul (sababta oo ah waxa ay u arkaan iyadoo la gorgortamo ama la wada xaajoodaba ka wanaagsan tahay iyadoo aan la wada hadlin, muhiim maaha in dhinacna wuxuu doonayo oo dhan wada helo). Haddaan sidaas maskaxda lagu hayn wax heshiis ah lama gaari karo. Waxaa dhinac kastaaba jecleyahay in dhinaca kale ku qanco si uu u xushmeeyo heshiiska la wada gaaray.

**Qormo**

**X/dhibaanka Deegaanku Markuu Yahay Gorgoriye**

**Tababarka Hogaanka La Doortay**

## Gorgortan labada dhinacba guul u ah

Waxaan u maleenaynaa in aad waayo-arag u tahay gorgortan noocan oo kale ah, hase ahaatee aadan sidan oo kale uga fikirin. Si aad noola fahantid gorgortanka dhinac walba ku guulaysto nala eeg tusaalahan:

"waxaad kasoo qaaddaa in Golaha Deeganka ee magaaladu u baahan yahay dhul banaan oo uu qashinka adag iskaga daadiyo. Waxaad kale oo kasoo qaaddaa in aan magaalada laga heleyn dhulkii loo baahnaa. Taa macnaheedu waxaa weeye in aad magaalada duleedkeeda meel ka raadsato. Hase ahaatee waxaad ogtahay in tuulooyinka miyiga ah ee kugu hareeraysani kasoo horjeedaan **inay aqbalaan qashinka cidkale!** Waxaa kale oo aad ogtahay in muwaadiniinta mid kamid ah tuulooyinkaas ay codsi u qortaan gudidda deegaanka tuuladooda si ay u helaan adeeg qashinka looga qaado. Hase yeeshee wakhtigan tuuladdu malaha qashin-uruurin habaysan iyo shaqaale farsamo-yaqaan ah oo arrintan talo ka bixin kara. Injineerkii magaaladuna wuxuu adiga iyo xubno kale oo Deegaanka ah si aan rasmi ahayn, idiinku wargeliyay, in tuuladdaasu ay tahay mid ka mid ah goobaha saddexda ah ee uu soo jeedinayo in ay noqoto qashin-qubka la rabo. Arrintu si kastaba ha ahaatee, waxaa idiin suurto gashay, adiga iyo xubnaha deegaanka ee kale, in aad guddigii tuulada kula heshiisaan in ay goobtaad u baahneedeen idin siiyaan, adinkuna aad siisaan adeegii qashin- uruurinta ee ay u baahnaayeen, waxaa kale uu labad dhinac ku heshiiyeen xeer-beegyadii (standards) wax lagu wada qabsan lahaa, arrintaasi waxay xakameysay muwaadiniintii goobta hortaagnaa, oo iyaguna magaalada ka helay adeegii ay ku taamayeen ee ay u taag-la'aayeen.

Waxaan oo dhan, waa wax la isku haleyn karo. Hase ahaatee, gorgortanku ma hawl yara. Waa wax murugsan oo mararka qaarkood noqda dagaal-maskaxeed oo dhinac waliba xariifnimadiisa kusoo bandhigo, marmarka qaarkoodna ah geeddi-socod hadba wax cusub lagu daahfurayo. Wuxuu dhinca waliba ku dayayaa dhinaca kale wixii xogo ah ee uu isleeyahay way anfacayaan, si uu taanuslaad uga helo. Wixii xogo ah ee la helo hadii si taxadar leh loo adeegsado, waxay gorgoriyayaashu bedeli karaan qiimaha uu leeyahay waxa laysku hayo ee miiska yaal, waxa la isku hayaa, xaaladaha caynkan oo kale ah, wuxuu noqon karaa wax allaale wixii dhinac u diyaaar yahay in uu waydaarsado waxa dhinaca kale hayo. Waxaasi wuxuu noqon karaa lacag ama alaab jirta. Xog helidda iyo awood-kororsiga iyada waa lagu gorgortami karaa. Waxaa iyana laga wada xaajoon karaa madax-bannaannida iyo degganaanta aad rabto inaad hawlahaaga ku qabsato, iyo wax allaale wixii baahida qof uu qabo qiimo u yeesha.

Waxay guusha wada-xaajoodka gorgoriyuhu inta badan ku xiran tahay sida uu tashwiish ugu furi karayo qiimaha waxa la la isku hayo. Hadii kale waxa lagu doodi karaa in qof kasta oo qiyaasi kara qiimaha dhabta ah ee waxa laga wada xaajoonayo uu hal-abuuri karo, intaas oo bedelaad oo isku dheeli tiran oo wakiiladda dhinacyada tartamayaa kala dooran karaan, hase ahaatee sidaas wax uma dhacaan. Cidkasta oo aan wada-xaajoodka la fududayno waxay garan karaysaa in awooddeedu ku jirto, sida ay dhinaca kale ugu qancin karto inuu mawqifkiisa hore beddelo oo uu qaato mid iyada dani ugu jirto. Dhankaa marka laga eegana wada- xaajoodka waa in loo fahmo wax la barto ama la baran karo.

**Qormo**

**X/dhibaanka**
**Deegaanku**
**Markuu**
**Yahay**
**Gorgoriye**

**Tababarka**
**Hogaanka**
**La Doortay**

## Aragti xeel-dheer

Markaan cilmi baarnay qormadan waxaan helnay xogo aanan ka qarin cidda aan isleenahay way idin dhageysaneysaa, waxaa xusid mudan in aan ogaanay Barthhelemy De Felice oo ah borofosoor (professor ) fiisigiska dhigi jiray, oo ku dhashay Roma 1723. Wuxuu fanka wada-xaajooodka ka qoray 13-volume, waxaa la daabacay isla markii dadweynaha loo soo bandhigay qoraalkiisii 58ka vole. Ee la oran jiray dictionnaire universal raisonne das connaissances humains. Inta badan De Felice, aragtiyihiisu waxay ahaayeen qaar ku cusub xiligiisii. Waxaa ka mid ahayd inuu qabay in fanka wada-xaajoodka la baran karo laguna dhalan karo. Wuxuu sharaxaad ka bixiiyay xaalado badan oo loo baahan yahay qof gorgortamaya adeegsado habab u gaara.

Wada-xaajoodku kuma koobna arrimaha caalamiga ah oo keliya, waa wax ka dhaca meel kasta oo ay ka jiraan khilaafaad la xalinayo, ama laga hirgelinayo ujeeddooyin la doonayo in la gaaro, ama rag la rabo in mawqifkooda la beddello. Runtii, nolosha oo dhan baa ka kooban wada-xaajood joogto ah. Waxaan markasta u baahanahay saaxiib aan hanano, cadowga aan ka adkaano, dadka kale oo fikradaheena ku qancino iyo fikrad xun oo nalaga haysto oo aan saxno. Waxaan adeegsannaa wax allaale wixii maangal ah ee aan barnaamijyadeena ku soo ballaarinayno. Waxaa jira waxyaabo gaar ah oo ay ka mid yihiin iska-hor-imaad dhanka caaddifadda ah, khilaafyada shakhsiyaadka dhexmara, iyo sida dhinacyadu u kala fikarayaan oo kala duwan. Waxyaabaha noocaas oo kale ah, ayaa mararka qaarkood murugtoodu gaaraan heer maarayntoodu u baahato isla tabaha iyo xeeladaha ay u baahan yihiin heshiisiinta awoodaha u waa weyn.

Fikrado hadda jira miyeysan ahayn? De Felice wuxuu hayey erayo dhiirigelin oo xilligiisii awood lahayn. Erayadaasi waxay dhiri-gelin u yihiin cida inaga midka ah ee aan lahayn ilo awoodeed oo rasmi ah.

Waxaa jira xoogag aan awood sidaas u sii buuran lahayn, oo hadda intay taageero helaan dhibaatooyinka ugu adag ka dabaasha. Guushooduna waxay salka ku haysaa (a) garashadooda (b) sida ay duruufaha ku xeeran ula qabsadaan (c) sida markastaba u garwaaqsaddan iyo sida xigmada oranysa; waxaan qori caaradii lagu dhacsan karin waxaa haboon loo gudbiyo madasha wada xaajoodka.

## Milicsi

Isku day in aad wax yar dib uga fikirto marmar hore oo aad wada-xaajood gashay adigoo ka wakiil ah qof ama koox. Qaabkee wada xaajoodka u gashay? Intee in leg baad u malaynaysaa in aad ku guulaysatay? Maxaad is leedahay haddaad qabato, guushaadu inta way ka sii badan laheyd.

**Qormo**

________________________________________________________________________________
________________________________________________________________________________
________________________________________________________________________________
________________________________________________________________________________

________________________________________________________________________________
________________________________________________________________________________

________________________________________________________________________________
________________________________________________________________________________

________________________________________________________________________________
________________________________________________________________________________

**Muxuu gorgortanku muhiim ugu yahay Dowlada Hoose?**

Wada-xaajoodku waa qayb ka mid ah geeddi-socodka siyaasada, kaaso ku lug leh gaaritaanka heshiisyo la xiriira (a) heshiisyo la rabo in laga gaaro qoondaynta khayraadka (b) go'aano laga soo saaro meesha ay cid waliba kaga jirto qaab-dowladeedka iyo (c) xalinta muranada u dhexeeya kooxo-bulsho ah. Xariijin khafiif ah ayaa u dhaxeysa maaraynta dhibaatooyinka iyo wada-xaajoodka oo labaduba ah habab Xubnaha Deeganku hawshiisa ku qabsado. Mida hore (maaraynta dhibaatooyinka) waxaan ku soo qaadanay bare-tilmaamaha ka hadlaya marka Xubinta Golaha Deeganku Fududeeyaha yahay. Sababta oo ah, waxaa noo muuqda xaalado fursad kuu siin kara, in aad dhibaatooyinka xaliso. Mararka qaarkood waxaa loo baahan yahay in marka hore xal loo helo dhibaatada si dhinacyada is-haya loo gaarsiin karo heer ay diyaar u yihiin in ay heshiis wada galaan khilaafka lagu dhameeyo. Haddii dhibaatada xal loo helo, way ka muhiimsan tahay in la isku raaco heshiis u wada cuntami kara cidaha uu khuseeyo oo dhan, waxaad u baahanaysaa in aad adeegsato hababka iyo xeeladaha kuu yaala bare-tilmamahan. Maaraynta dhibaatada waxaa inta badan ku jira gacan saddexaad oo ay dibada uga yeeraan dhinacyadu si loo dhameeyo khilaafaadkooda. Hase, ahaatee, inkasta oo uu dhinac saddexaad soo geli karo, hadana wada-xaajoodku wuxuu khuseeyaa dhinacyada raba in ay heshiiska wada gaaraan.

Wada-xaajoodku waa xirfad looga baahan yahay dowlada hoose, waxaana sidaa ka dhigaya dhawr sababood. Marka hore, dowladaha hoose ma'aha wax ka baxsan heerarka kale ee Dowladda Dhexe. Wuxuu ururkaagu (dowlada hoose) si joogto ah ugu jiraa wada-xaajood. Marka Dowladda Dhexe ayuu awoodaha la kala leeyahay kula gorgortamayaa, marna dowladaha hoose ee kale ee ay xudud-waddaaga yihiin marna hay'ada kale ee

Qormo

Xuduudkiisa ku jira ee fulinaya barnaamijyo ay isla-galayaan, kuwo uu isagu wado. Marka labaad, wada-xaajoodka waxaa looga baahan yahay ilaa heererka ugu hooseeya ee dowladda; qof muwaadin ah iyo wakiil dowlada hoose ka socda ayaa u baahan kara in ay heshiis ka gaaraan arrimo dadka intiisa badan ugu muuqda wax an wax kasoo qaad layahayn, hase ahaatee ku culus cida xog-ogaalka ah. Mar hadii wada-xaajoodku sidaas u bedel-bedel badan yahay, waxaa looga baahan yahay xubin ka tirsan bahda dowlada hoose ee xiriirka la leh dadweynaha ama laamaha kale ee dowladda, in ay si bilow ah u bartaan wada-xaajoodka.

## Xaq-dhowr kala duwanaanta dhaqammada

> Ganacsade reer Jabaan ah iyo bare sare oo Maraykan ah, ayaa dhowr sano ka hor wax ka qoray gorgortanka oo la mid ah wada xaajood. Waxay farta ku fiiqeen sida guusha gorgortanku ugu xiran tahay sida loogu xisaabtamo dhaqam-mada kala-duwan. Qof kasta oo dal kale u dhoofay oo soo arkay qaabka ay qiimaha alaabta ugu gorgortamaan, wuxuu ogaanayaa in uu yahay mid gaar u ah oo ay fac- ka fac ku soo dhaqmayeen marka hore qaabka aad u gorgortamaysaa waa in uu ka turjumaa dhaqanka meesha yaalla. Arrintaas waxaa ku jira wax yaabaha yaryar oo ay bulshadu isku midka ah ay dhaqan ahaan ku kala duwan yihiin, dadka qaar waxay ku doodaan in dadka saboolka ah ay leeyihiin dhaqan iyaga u gaara oo ay tahay in ay xushmeeyso cidii rabta in ay xiriir wax-ku-ool ah la samaysato. Marka labaad waxaa loo baahan yahay wax kasta oo wada-xaa joodka laga sheego, in la iska shaandheeyo inta aan ku dabaqin xaalada kuu gaarka ah Graham iyo Sano, labada qorraa ee aan kor ku soo sheegnay, waxa buuggooda la yiraa “smart bargaining” (gorgortanka xariiftinimadu ku jirto), waxay ku sheegeen qodobbo dhowr ah oo muhiim ah oo Maraykanka iyo Japan ku kala duwan yihiin, kuna salaysan fikradaha kala duwan ee ka kala haystaan qaabka loogu gorgortamo ganacsiga.

X/dhibaanka Deegaanku Markuu Yahay Gorgoriye

Waxaan arrintan uga sheekeenaynaa in ay muhiimadda ay leedahay in laga war qabo khilaafaadka noocaas oo kale ah; iyo in aan faahfaahino ka siino khilaafaadka dhaqameed ee ay tahay in aad ogaato intii aadan gorgortanka gelin.

Waxaa loo baahan yahay inta aan cida labada dal ka kala socotaa aysan isugu imaan miiska wada-xaajoodka, ay kasii war qabaan in Jabbaneysku qiimeeyaan (a) in qofku cid kale kaashado (b) in go’aan qaadashadu wadar tahay (c) in xiriirka ganacsatada ka dhexeeyaa yahay mid la kala sareeyo iyo (d) in la tixgeliyo waxa ay u yaqaanaan “amae” oo ah in si indho la’ loo kala danbeeyo.

Tababarka Hogaanka La Doortay

Maraykankuse sidaa way ka duwan yihiin oo waxay qiimeeyaan (a) in qofku tartamo (b) in xiriirka ganacsatada ka dheeeyaa yahay mid lo gudboon yahay (c) in madax-bannaani jirto.

Marka labadaas dhaqan miiska soo wada fariistana, waxay la sii kulmaan khilaafaad ka sii qoto dheer. Maraykanku waxay door bidaaan fadhi isku-laylin ah oo gaaban oo aan rasmi ahyn. Dhinaca kale, Jabbaneysku waxay

jecel yihiin in ay helaan fursad aad u dheer, oo rasmi ah, oo gorgortanka lagaga bogto.

Marka laysla gaaro in xogo la is-waydaarsado Jabbaneyska gorgortamayaa malaha awood uu ku go'aan qaato, mana laha hadal cad oo lagu talo galo. Wuxuu leeyahay guud ahaana awood buuxda oo xogo laysku dhaafsan karo.

Waxaa la arkaa in ruuxa Maraykanka ah markiiba kusoo hordhigo qiimo uu u haysto In aysan "dulmi" lahayn halka uu ruuxa reer bariga ah gorgortanka ka bilaabayo meel aad u saraysa, taas oo keenta gorgortan dheer. Waxaa kuu muuqata in labadaa qof ee gorgortanka isugu yimid ay dhexdooda ku yaallaan farqi dheer oo loo baahan yahay in ay ka gudbaan inta aysan gorgortanka dhabta ah gelin.

In ay kuu cuntami waydo faalladan ayaa suurta gal ah markaad xaaladdada eegto. Hase ahaatee, xilligan la joogo ee arrimuhu si deg deg ah isku bedelayaan, waxay golayaal deegaan oo badan is arkeen iyagoo ay soo wajaheyn xaalado badan oo  u baahan in gorgortanku ka gudbo xuduuda dhaqamada. Reer miyiga ku soo qul-qulay magaalooyinka, qaxootiga dalalka ka soo gala oo la yimaada hab-nololeed cusub---- xaaladahaas oo dhan, waxay wataan dhibaato is-hor-taagi karta hawsha maamulka deegaankaaga hadii aan gorgortan loo gelin sidii la iskugu soo dhawayn lahaa.

## Milicsi

Inta aadan halkaan hore uga gudbin, waxaan rabnaa in aad ka fikirto " siyaabaha kala duwan" ee bulshadaada dhexdeeda looga gorgortamo iyo wixii  dhib ka dhalan kara. Ma jiraan bulshadiina kooxo ka mid ah oo ay kugu adkaato in aad garato sida ay u gorgortamaan, dhaqankiina oo kala duwan dartiis? Maxaa ku kala duwan tihiin, sidee u saamaysay xiriirka dowladda hoose iyo kooxahaas hada ka hor? Maxaad ka rajeyn kartaa oo keeni kara gorgortan fiican marka danbe ee aad isa soo hor fariisataan kooxahaas si aad u gaaraan is-afgarad iyo heshiis?

Qormo

X/dhibaanka
Deegaanku
Markuu
Yahay
Gorgoriye

Tababarka
Hogaanka
La Doortay

## Sidee baad gorgortanka ugu guuleysan kartaa?

Gorgortanku waa shey caan ah. Maktabadaha buugaagta ee ugu caansan ayaa laga heli karaa wadooyinka ugu wanaagsan ee aad gorgortan ku geli kartid. Waxaan rabnaa inaan kula wadaagno qayb ka mid ah fikradaha ugu wanaagsan ee la heli karo ee laheli karo, aan eegno qaar ka mid ah farqiyada u dhexeeya ee labada khuburo si ku xaqiijiyaan aragtidooda. Dadka badidiisu waxay isku raaceen labada qoraa ee kala ah roger fisher iyo william ur, ee leh buugga “getting to yes” ama sidee loo helaa haa, ee ku saabsanaa jaangoynta ugu habboon ee loo gorgortamo. (Badi dadku waxay isku raacayaan inu buugaasi ka mid yahay kuwa ugu fiicn eek a hadla mawduucan). Gorgortanka fiicani waa inuu:

- Soo saaraa heshiis waafi ah hadii uu heshiisba suura gal yahay.
- Wax-ku-ool yahay (la beekhaamiyo wax walba oo wakhtigu ka mid yahay)
- Xoojiyaa ama ugu yaraan aanu dhaawicin xiriirka labada dhinac.

Waxa ay qorayaashu ku tilmaameen in heshiiska waafiga ahi “intii suura gal ah ku dhisnaado danta sharciga ah ee labada dhinacba, oo si aan dulmi ku jirin u kala maareeya danaha iska hor imanaya isla markaana aan ka tegin danaha bulshada”. Labada qoraal qaabka gorgortan ee ay soo jeediyeen waa mid fudud, hase ahaatee waa mid guul lagu gaari karo. Waxaana ka mid ah afartan talaabo ee soo socda in la raaco:

**Tallaabada kowaad**: kala saar dadka iyo dhibaatada

**Tallaabada labaad**: aragtidaada ku uruuri oo ka leexi dhinaca aad ka taagantay arinta.

**Qormo**

**Tallaabada saddexad**: abuur qodobo la kala doorto oo dhinac walba dan ugu jrto

**Tallaabda afraad**: ku adkayso in lagu dhaqmo jaan-goyn aan damac qofnimo hoggaminaynin.

## Gorgortan anshax leh

Afartan tallaabo waxaan ka helynaa tabaha gundhigga u ah waxay ku tilmaameen Fisher iyo Ury "qaabka anshaxa leh". Habkani wuxu u dhisan yahay uu dhaliyo natiijo garwaaqsi leh oo turxaan la'. Haddaba aan eegno afartii tallaabo oo faahfaahsan.

**Dadka:** had iyo jeer waa waxaa la garab maro gorgortanka iyo dulucda dantu ku jirto marka dadka iyo dhibaatada la kala saari waayo. Marka ay qof qof isku weeraraan dadka gorgortamaya ee ay garbasiman uga wada shaqayn waayaan sidii ay dhibaatada u dawayn lahaayen, gorgortankii anshaxa lahaa wuxuu si degdeg ah isugu bedelayaa jaafaajiqir iyo muran aan natiijo lahayn.

**Danaha:** hore ayaan u soo qaadanay tallabadan laakiin waxay u qalantaa in aan ku celino. Lama soo fariisto meel lagu gorgortamayo addigoo sii cadeeyay meeshaad ka taagan tahay arinta laga gorgortmayo. Waxadse awooddaada ku soo ururisaa danta aad leedahay miraha aad ka heli karto hadii aad si fiican u gorgortanto.

**Qodobo la kala dooranayo:** inta aadan u jeesan inaad heshiis kama dambays ah la gaartid dadka aad la gorgortamyso, waxaad wakhti ku qaadataa in aad abuurto qodobo la kala dooran karo oo adiga iyo dhinaca kaleba dani ugu jirto baahidiinana dabooli kara.

**X/dhibaanka Deegaanku Markuu Yahay Gorgoriye**

**Jaan-goyn:** ku hal adayg in heshiisyada lagu saleeyo jaan-goyn aanay damac qofnimo ku lamaanayn. Arrimahaa heerbeegga ah la'aantood, heshiisayadu waxay noqdaan waxaan qeexnayn oo goldaloolooyin badan leh isla marka laga kaco goobta gorgortanka. Jaa-gooynta aan damac qofnimo ku lamaanayn oo la raacaa waxay adiga iyo dhinaca kaleba u suura gelisaa inay heshiisyada ay isla gaareen fuliyaan.

Gorgortanada anshaxa lahi waxay ku dhisan yihiin mutaysi, afar-tan tallaabana waxay mutaysteen in aad dhuuxdo oo fahanto si aad ugu guulaysato gorgortanadaada.

**Tababarka Hogaanka La Doortay**

Haddaba aan markanna eegno aragtidan sida aadka ah uga duwan tii hore ee habka gorgortanka oo uu soo jeediyay cilmi-yahanka farshaxanka ah oo aqoon gaar ahna u leh ururrada lana yiraahdo Pete Block. Buugga uu qoray isagu ee la yiraahdo maareeyaha la awoodsiiyay (the empowered manager), Block wuxuu dhiiri gelinyaa adeegsiga xirfadaha siyaasiga ah ee sugan si maareeyahu u noqdo mid wax ku-ool-leh waxa uu habkii gorgortankii ku

tilmaamay mid aad aragtidaada ugu raadinayso taageero iyo dhisid is-bahaysi dad kale. Sida Block uu leeyahay, nuxurka gorgortanku waa heshiis iyo kalsooni, dadka gorgortamayaana xiriirkooda labadaa arrimood ayuu sal uga dhigay wuxuuna ku kala saarayaa hadba sida ay u sarreeyaan ama u hooseeyaan heshiisyadooda iyo kalsoonidoodu.

Jaan-gooyntani waxay xiriir la leedahay kuwii ay soo bandhigeen Fisher iyo Ury laakiin waxa uu adeegsanayaa arar ay ka mid yihiin "caddalad iyo sarriig" si uu u muujiyo habkiisa iyo qaabkiisa gorgortan.

## Maxaad dhab ahaan rabtaa?

Bare-tilmaamihii ahaa Xubin Gole Deegaan oo Go'aamiye ah waxaanu si aad ah ugaga hadlaynay sida ay u dhib badan tahay in xal loo helo dhibaato intaan si cad loo qeexin waxay tahay. Mid dhibtaa la mid ah ayaa hor imanysa qofka gorgortan galaya ee aan garanyn waxa uu rabo inuu guto, imisa jeer ayaad maqashay ururka shaqaalaha oo gorgortan ba'an ugu jira iyada oo xubnihiisa wax kale kaga kulul yihiin taas oo ah in aan shaqada laga eryin.

Marka baahida xubnaha ee runta ah la muujiyo oo kaliya ayaa gorgortanka hore loo marin karaa. Qofka loo shaqeeyaha ahi wuu ka biyo diidayaa in halmar si isku mid ah loo kordhiyo mushaharka, laakiin wuu ka fiirsan karaa hadii arintu ku koobnaato in la dhimo shaqaalaha iyadoo qaar hawl-kafariisin la geliyo qaarna iskood hawsha uga fariistaan. Fisher iyo Ury waxay sheegeen in dhib wayni ka dhacdo marka ay laba dhinac oo gorgrotamayaa mid waliba mawqifkiisa ku adkysto. Waxay na xasuusiyeen, in hadii mawqif la qaato oo laysku dabro mawqifkaa ay lunto dabacsanaantii loo baahnaa ee keeni lahyd wax door-bid leh. Bedelka waa in aad culays saarto danaha. Mawqifkaagu waa waxaad go'aan ka gaartay, halka ay dantu ka tahay, waxa ay kugu kaliftay in aad mawqifka qaadato. Inta badan dantaadu way ka dahsoontahay dhinaca kale ee kula gorgortamaya. Waxaa kaaga wacan in aad meel ku dheganaato in aad sheegto sababta aad mawqifkaa u qaadatay. Mawqif waa mawqif uun. Halkaasuu taagnaanayaa inta aan bedelayno; hadaad mawqif kale keento isna waa midkle oo cusub uun. Dhanka kale, danaheenu way kala duwanaan karaan wanay badan karaan.

mawqif qaadashadu waxay u yara dhigantaa adigoo dhibaatadaa oo aad sheegato u qaata xalkeeda. Mar hadaad toobiyaha qaadana, way adagtahy in bedel la helo. Waxaa haboon in wakhti lagu qaato si dhibta loo helo. Marka la helana, inta badan xalka wa la helaa. Danaha nagu kalifay in aan mawqif qaadano sida taa dhibta oo kale ayaynu ku tilmaami karnaa. Mabaadii' isku mid ah ayaa ku dabaqma marka dan la raadinayo iyo marka dhib la sheeganayo.

Sida badan gorgortanka waxa laysku mari wayaa marka ay dadku isu muuqdaan oo qab qab dhaafay yeeshaan. Qofkii baynu markaa culayska saarnay oo dhibtii isu keen keentay ayaynu garab marnay. Markay arinu halkaa martana, waxa loo baahan yahay in labada qof tooda la furdaamiyo

Qormo

intay doonto ha qaadatee intaa loo gudbin wax kale. Dhibta dadka dhextaala waxay soo ifbaxdaa  markay: A) qofka xogta aad ka haysataan tahay ismaan-dhaaf ama war been ah. B) dareenku aad u kaco. C) kala xiriir furasho dhacdo. Marka dhibta gorgortamayaasha u dhaxaysaa ka hor timaado xalintii dhibaatada laga gorgortamayay, waxa la soo gaaray jid aan rajo lahayn.

## *Af aan kuqu ool ma qaban kartid*

Ruuxii gorgortami karaa dhibaato furdaamin kara. Waxaan kaga hadalay sida dhibaato loo maareeyo bare-Tilmaamihii hore ee ahaa xubinta golaha deegaanka oo go'aamiye ah, hase yeeshee aan markale dib u milicsano waxyaabihii aasaasiga u ahaa,

- Ugu horayn, dhibaatada hel. Maxay tahay? Halkay ka jirtaa? Goormay dhacday? Kumaa dhigay? Iyo, maxay dhibaatdu tahay?
- tan labaad, maxaad doonaysaa in aad gudato si aad u furdaamiso dhibaatada? Maxaad ka rajaynaysaa in ay kasoo baxaan furdaaminteeda?
- Tan sadexaad wa maxay qodobada la kala dooran karo ee aad haysaa si aad u xaliso dhibaatada kuna gaarsiin kara ujeedadada?
- Ugu danbayntii, waatee tallaabada ugu fiican ee ad qaadi karto si aad u fuliso qodobka ugu fiican guushana u hanato?

Markii aan baranaynay waxyaabaha ay ka kooban tahay go'aan qaadashadu ee ku yaallay buugii magaciisu ahaa xubinta golaha deegaanka oo go'aamiye ah waxaynu culays saarnay muhiimada ay leedahay in awooda laysugu geeyo tayada go'aanka iyo sida dadka uu saamaynayaa ay u ogolaan doonan, labadaa jaan-goynood ba waa lagama maarmaan marka la gorgortamayo. Gorgortamayaasha fiican waxay ku hawlaan naftooda tayada iyo sida loo ogolaan doono gorgortannada ay galaan, dhinacyada kale waxay ku taageeraan in ay helaan natiijooyin tayo leh oo iyana u cuntama dadka ay saamayn doonaan.

**X/dhibaanka Deegaanku Markuu Yahay Gorgoriye**

### Haku dhawaaqin mawqifyada laakiin ogsonow waxa ay yihiin

Hore waxaan u sheegnay in gorgortmaha fiicani dantiisa u guntado, ee aan mawqifkiisa isku dhejin. Weli sidaas ayaan qabnaa. Hase ahaatee, waxaa kale oo aan aaminsan nahay in aysan gelin goobta lagu gorgortmayo inaga oo an garanayn waxay yihiin mawqifyadeena waaweyni. Mawaaqiftaasi waxay yihiin: ma tahay natiijadii aan doonaynay, su'aal sidee bay arrimuhu noqon karaan hadii wixii aad rabtay oo dhan heshid? B) maxaa suura gelin kara, markaad eegto baahida qofka ama dhica kale ee gorgortanka? Waa maxay halka ugu danbeysa ee aadan hoos uga degi karin?

**Tababarka Hogaanka La Doortay**

Ogaalkaaga mawaqiiftaasi waxay si cad kuu tusaysaa halka aad hawshaada ku gudaneyso. Waxaa kale oo ay sheegaysaa in aad uga sii fikirtay meelaha aad arrimaha iska taagayso inta aadan gelin gorgortanka.

**Qormo**

Hadaba anagoo kugula talinay in aad si cad u ogaato natiijada aad doonayso, wixii run-kama-raysata ah iyo arrinkaaga gunti ku reebka ah, hadana waxay nala tahay in aad hada dhinac isaga leexisid. Hakuu noqdaan waxaad adeegsato markaad u gorgortamayso dano aad leeday, talo dhan loo raaco la garan la'yahay ayaad mooddaa, lakiin xusuusnow in ay kugu adkaan doonto in aad danahaaga daba gasho iyo kuwa dhinaca kaleba haddi labadiinna dhinacba mawqif adag isku xirtaan.

***Xirfadaha gorgortanka: waa qaar ka mid ah saaxiibada ugu fiican ee xubinta golaha deegaanku yeelan karo***

Xirfadaha gorgortanka ee waxtarka leh laguma baran karo aqoon isweydaarsi gaaban oo kan oo kale ah.

Gorgortanka, ama go'aan ka qaadashada ay ka qayb qaataan dadka kale waxa soo baxaya in ay isku si inoo wada saamaynayaaan: waa waxaan maalin walba ku kacno inagoon is ogayn.

Sababtoo ah gorgortanku waa wax nolol maalmeedka qoyska ka mid ah, suuqa aan wax ka iibsano, goobaha shaqada rasmiga ah ee xubnaha goluhu tagaan maalin walba: waa xirfadaha aan la dafiri karin. Waxaan rajaynaynaa in aad marba ku noq-noqoto fikrada qoraalkan kooban oo aad kaalintaada gorgortame iyo sidii aad hore ugu marin lahayd ka fikirtid.

***Buurbaan dhaqaajinnee, wixii kaleba bar qura ma bariinsadaan***

**X/dhibaanka Deegaanku Markuu Yahay Gorgoriye**

**Tababarka Hogaanka La Doortay**

**Qormo**

**X/dhibaanka Deegaanku Markuu Yahay Gorgoriye**

**Tababarka Hogaanka La Doortay**



## Qodobo muhiim ah

- Gorgortanku waa qayb dabiici ah oo geedi socodka siyaasada ka mid ah.
- Gorgortanku waa geedi socod siyaabo badan loo adeegsan karo oo xubnaha golaha deegaanka ka caawin kara sidii ay hawshooda u gudan lahaayeen si wax ku ool leh.
- Gorgortanku waxa uu ku gargaaraa labada dhinac ee is horfadhiya in ay curiyaan qodobbo la kala dooran karo.
- Labada dhinacba markii ay isku arkaan in ay guulaysteen ayaa la helay gorgortan wax ku ool leh.
- Xog wadaaga ayaa fure u ah gaarista xal labada dhinac waxtar u leh oo dhibaatooyinka adag lagaga gudbo.
- Gorgortanku waa istaraariijiyad siyaasadeed oo curad ah. Taariikh dheer bay leeyihiin adeegsigeeda iyo horumarkeeduba.
- Dhaqamada kala duwan ee dhinacyada gorgortamaya leeyihiin waxay u yeelaan karaan iyo waxtar.
- Gorgortamayaasha suubani waxay si isku mid ah xil isaga saaraan saamaynta uu gorgortanku ku yeelanayo xiriirka ay dhinacyada kale la leeyihiin iyo natiijada muuqata ee ay u baahan yihiin in ay gaaraan.
- Gorgortamayaasha habooni waxay culayska isugu geeyaan daba galka danahooda ee kuma dhagaan mawqif gaar ah.
- Awooda gorgortamuhu leeyahay waxay halbawle ka tahay geedi socodka gorgortanka.
- Geedi socodyada xallinta dhibaato iyo gorgortanku wax badan ayay iskaga mid yihiin.
- Doorarka iyo xilalka uu urur ama hay'adi yeelanayso waa in laga gorgortamaa, gaar ahaan hadii dhibaato ka jirto wax laga qabanayo, cidii qabanaysa iyo dadka loo qabanaayo.
- Gorgortanku waa xirfad uu xubinta goluhu u adeegsan karo xaajo kasta oo murugsan.

**Qormo**

## Raad-raac


1. Barthelem de Fecile, Fortune, "Negotiaiton, or the art negotiationg" translated from dictionare de justice naturelle et civile, in Zeltman, William, the 50% solution (Garden City, NY.,Anchor Books, 1976).P.47

2. Ibid

3. Grahm John L, and Sano, Yoshihiro, Smart Bargaining (New York, Harer and Row 1989), pp.7-34,

4. For more complete discussion of efferctive negotaition, see Fisher, Roger and Ury, Willa, (The Method,"Ch.2. Getting to yes: Negotiating agreement with out giving in (Boston, MA, Houghton Mifflin, 1981).

5. Ibid, pp 11-23

6. For a more detailed discussion of the use of psiie political skills, see Block. Peter, "Building support for your vision" ch.5, the empowered manager (San Fransisco, CA, Jossey, 1987).

## Qaybtii 2aad

## Aqoon-is-weydaarsi:

## Xubinta Golaha Deegaanku markuu yahay Gorgoriye

**X/dhibaanka**
**Deegaanku**
**Markuu**
**Yahay**
**Gorgoriye**

**Tababarka**
**Hogaanka**
**La Doortay**

**Aqoon is weydaarsi**

**X/dhibaanka Deegaanku Markuu Yahay Gorgoriye**

**Tababarka Hogaanka La Doortay**



**DULMAR GUUD**

**Ujeedo:**

Gorgortanku waa tubayn firfircoon oo ay isugu yimaadaan ugu yaraan laba dhinac si ay u furdaamiyaan is-af-garan-waa ama heshiis la'aan dhex taala oo ay ku gaaraan go'aan gocosho lahayn. Dulucda aqoon iswaydaarsigani waa sidii loo gaari lahaa heshiis hirgala iyadoo la raacaayo habka " gorgortan hufan". Ka qayb galayaashu waxay aqoonsan doonaan oo ay ku dhaqmi doonaan gorgortanka hufan si ay uga helaan waxay ka rabaan dadka kale iyaga oon ku gabood falin.

*Aan wada hadalno waa aan heshiino*

**Tusmooyin**

Tilmaan kooban oo ku saabsan falalka waxbarasho kasta iyo wakhtiga loo malaynayo in ay qaadan karaan ayaa hoos ku cad. Hadii aad jeclaysato in aad bedesho hab taxanahooda, in aad qaar ka baabi'iso ama aad wax ku kordhiso waad yeeli kartaa

**7.1 layli:- Diyaar-garow ah: sidee baan u gorgortanaa?**
Ka qayb galayaashu ha xasuustaan marmar hore oo gorgortan ka qayb qateen oo kooxo yar yar haysu qaybiyeen oo ha ka sheekaysteen. (45 daqiiqadood)

**7.2 Bandhiga tababaraha**
Tababaruhu waxaa uu si kooban uga hadlaya xubinta golaha deegaanku marka ay kaalinta gorgortamayaasha hayaan. Adigoo adeegsanaya qoraalkii laga soo gudbay iyo aqoontaada oo u balbalaari qaar ka mid ah habka ugu haboon ee loo gorgortamo iyo sida gorgortamayaasha fiicani guul iyo barwaaqo gaaraan iyagoo racaaya dhawr arrimood oo gundhig u ah gorgortanka. Tusaale gorgortan usii.

Kaalinta xubin deegaan uu ka hayo golaha uu ka tirsan yahay ama laba gole oo laba heer oo xukuumada ah ka tirsan iyo is-af-garan-waaga iyo madmadowga ka dhasha. (30 daqiiqadood)

**7.3 Door-jilid/daraasad xaaladeed. Cagaf-cagaf/Baldoosar lasyku haysto.**
Ka qayb galayaashu waa in ay iska dhigaan xal iyo heshiis u raadinayaan muranka ka dhex aloosan laba degmo oo ku saabsan adeegsiga cagaf cagaf/baldoosar (60 -75 daqiiqo).

Aqoon is weydaarsi

**7.4 Layli. Luuqada wada xaajoodka**

Ka qayb galayaasha waxaa laga codsanayaa lix tabood oo ay adeegsadaaan waayo araga gorgortanka ee ay Maraykanka iyo Ingiriisku oo ay barbar dhigaan tabaha gorgortanka ee laga adeegsado dalkooda (120 daqiiqo)

**7.5 Door jilid/Daraasad xaaladeed. Khillaaf u dhexeeya bacadlaha iyo golaha deegaanka.**

Ka qayb galayaasha oo ah laba kooxood ayaa laga codsanayaa in ay akhriyaan xaalad kul ug leh iska hor imaad bacadlayaal mudo shir caalami ah socdo oo doonaya inay goobta agagaarkeeda wax ku gadaaan iyo golaha deegaanka danahoodu is diidan yihiin. Ka qayb galayaashu waxay ciyaarayaan doorka golaha deegaanka iyo ka bacadlayaasha kadib waxay ku gorgortamaay danahooda kala duwan (120 daqiiqo)

**7.6 Layli xirfad gudbineed**

Ka qayb galayaashu waa in ay muujiyaan waxay barteen sameeyaana balan qaadyo ah in ay adeegsan doonaan aqoon iswaydaarsiga kadib. (45 daqiiqadood)

Aqoon is weydaarsi

## 7.1 Layli iskulaylin
## Sideebaad u gorgortantaaa?

Layligani waxa uu ka caawinayaa ka qayb galayaasha si ay u xusuustaan kadibna u wadaagaan khibradooda xaga gorgortanka.

Waydii ka qayb galayaasha in ay xasuustaan khibrad gaar ah oo ay u adeegsadeen gorgortanka, una soo jeedi in ay is waydiinayaan dhacdo walba iyagoo adeegsanaaya waydiimaha ku qoran bogga soo socda ama qaar kale oo ay keeni karaan. Marka la siiyo ka qayb galayaasha mudo daqiidaqo yar ah oo ay waydiimaha ku akhriyaan kagana jawaabaan, uqaybi kooxo yar yar oo ka kooban shan qof kadidbana sii kooxdiiba 30 daqiiqo oo ay dood is waydaarsadaan.

Marka ay kooxaha yaryari dib u furtaan shirkooda waydii aragtiyo iyo afkaar wixii soo shaac baxay marki ay doodayeen

## Waydiimo ku saabsan waayo aragnimo gaar ah oo qofku u leeyahay gorgortanka arin.

X/dhibaanka Deegaanku Markuu Yahay Gorgoriye

Tababarka Hogaanka La Doortay

1. Waligaa miyaad …………………
    - Kala gorgortantay madaxdaada mushaar kordhin, xafiis aad rabto meel ka fiican in loo raro, ama kor u qaadid tayada xaalada shaqo oo liidata?
    - Cid ka hoos dustay ama tubta caadiga ah dhinac martay si laguugu xayiro kuraas aad ka rabto garoon cayaareed, riwaayadeed ama diyaaradeedba?
    - Isku dayday in aad hesho xogo dheeraad ah marka laguu bandhigo agab lagaa iibinaayo?
    - Ka walaacday in aad waydiimo dhibaato adigoo ka cabsi qabo in laguu arko qof warmooge ah?
    - Xiriirkaada shakhsi ahaaneed, ugu dulqaadatay habdhaqan liita oo aad cid kale kugula kacday adiga oo:
        - Ka waji dadbaaya in aad ruux kale isku dhacdaan.
        - Dareensan in aadan doodaada si qeexan ugudbin karayn.
        - Aan doonayn inaad wax yeesho dareenka qofka kale iyadoo falalka uu ku kacayaaa wax ku yeelaayaaan.

Aqoon is weydaarsi

2. Dooro mid ka mid ah waydiimaha aad kaga jawaabtay Haa ka dibna ka jawaab waydiimaha soo socda ee quseeya.

   Xaaladaasi maxay ahayd?

_______________________________________________________________________________

_______________________________________________________________________________

_______________________________________________________________________________

Maxay jawaabahaagu ka yiraahdeen xaaladdaada adiga oo ah gorgortame?

_______________________________________________________________________________

_______________________________________________________________________________

_______________________________________________________________________________

_______________________________________________________________________________

_______________________________________________________________________________

_______________________________________________________________________________

Sidee baa xiriirkiinu noqday, adiga iyo qofkii kaleba xaalada kadib?

_______________________________________________________________________________

_______________________________________________________________________________

_______________________________________________________________________________

_______________________________________________________________________________

_______________________________________________________________________________

_______________________________________________________________________________

Aqoon is weydaarsi

## 7.2 BANDHIGA TABABARAHA
## Sideebaad u gorgortantaaa?

**Waqtiga loo baahanyahay: 30 daqiiqo**

**Ujeedo:**

Soo bandhigida waxaa loogu talo galay in ka qayb-galayaasha lagu siiyo afkaar ku saabsan doorka gorgortanka. Waana qalab casriyaysan oo anfici kara marka ay qof qof ama koox ahaan layliyada u samaynayaan.

Diiyaari soo jeedin ku salaysan war ka soo jeeda maqaal hore oo ku saabsan doorka gorgortanka. Gaar ahaan, waxaad sharax ka bixisaa siyaabaha wax ku oolka ahi ay ugu gaaraan xalal lagu raali noqdo iyagoo raacaya dhawr talaabo oo asaasi ah. U sharax sida doorka gorgortanka u noqon karo istaraatiijiyad Xubin Golaha deegaanku u adeegsan karo xalinta isku dhaca caadiga ah ama madmadow dhex yimaada dowladda hoose ama heerarka kale ee dowladda.

Xogo qeexan oo ku yaala kaarar ayaa kaa caawin kara in aad u dhamayso macluumaadkii si habaysan adiga oo ku taagan jadwalka. Su'aalo waydii marba inta bandhiggu socdo adiga oo hubinaya fahamka ka qayb-galayaasha, adiga oo hananaya dareenkooda dhageysi.

Bandhig ku faahfaahi kaabayaal ay ka mid yihiin waraaqo / maqaalo hore loo daabacay iyo qoraalada project-tarka ee darbiga lagu daawado si aad usii caawiso fahamka.

Aqoon is weydaarsi

## 7.3 jilid diraasad xaaladeed: CAGAF /BALDOOSAR HAYSTO

### Waqtiga loo baahanyahay: 60-75 daqiiqo

### Ujeedo:

Layligan waxaa loogu talo galay in ay ka qaybgalayaashu isticmaalaan xirfado gorgortaneed si ay u xaliyaan khilaaf ka dhex dhacay laba degmo oo iskaga hor yimid adeegsiga cagaf (bulldozer).

Qaybi dacwada iska hor imaadka cagafta. U sheeg ka qeyb galayaashu in ay akhriyaan dacwada iyo qeexida doorka saddex sarkaal oo ka shiraya xalinta iska hor imaadka .

U qaybi ka qayb galayaasha kooxo yaryar oo min sadex qof ah. Qof kasta oo ka mid ah kooxaha yar yari ha metelo saddexda xubnood mid ka mid ah..

Marka ay xubnaha kooxda yaryari gartaan kaalinta ay metelayaan. U sharax in xubin kasta oo ka mid ah kooxaha yaryari uu la galo wada hadalo xubnaha kale ee kooxdiisa. Ujeedadu waa in la gaaro xal lagu wada isticmaali karo cagafta: kaas oo ay raali ka yihiin xukuumadda/waaxda ay xubin waliba ka socoto.

U sheeg in ay xubnaha kooxuhu haystaan 30 daqiiqadood oo ay ku gaaraan go'aan kana jawaabaan weydiimaha soo socda ee ku saabsan dhacdadan:

1. Sidee dhinac kasta oo gorgortamayaa u arkaa in lagu heli karo xal la aqbali karo?
2. Waa maxay natiijada ka soo baxday gorgortanka?
3. Hab noocee ah ayaa la raacay si loo gaaro natiijadaa?
4. Sidee koox waliba raali ugu tahay natiijada? Sababtuna waa maxay?

Marka wakhtigu dhaco, isugu yeer kooxaha yaryar oo weydii warbixinta koox walba siiba jawaabaha afarta weydiimood.

**Aqoon is weydaarsi**

## Is-af-garanwaaga cagafta/ Baldoosarka

### Xaaladda

Is-af-garan-waaga ka dhex dhacay madaxda xukuumada Apac iyo Lira ay isku maan dhaafeen wadaaga cagafta laga dhexaysiisyay. Xubnaha Golaha Deeganka ee degmada Apax waxay ku eedaynayaan Lira inay xuurto ku haystaan isticmaalka cagafta.
Reer Lira waxay leeyihiin waxaanu ka soo kaxaysanaa cagafta Apac markay iska taal een lagu hayn wax shaqo ah.

Arintani waxay dood kulul ka abuurtay shirkii guddiga horumarinta dawlada (DDC) oo ku shiray Apac toddobaadkii hore. Markaasoo xubnaha Golahu su'aalo badan weydiiyeen Mike Odpongo, Ingineer sare oo madax ka ah hawalaha guud ee Apac iyo Lira labadaba. Xubnaha Golaha Deeganka Apac wuxuu ku andacoodey intaanay Lira qaadan cagafta in lagu dayac tiray lacag ay leedahay Apac. Wuxuu soo jeediyay in ay Lira magdhowdo Apac qiimaha dayac tirka.. ingineer Odpongo wuxuu ku sheegay in arrintaani macna daro tahay waqti badane ka lumineeso labada dhinac.
Wuxuu tilmaamay in qaybaha cagafta qaarkood ay dhaksho u dhamaadaan oo la bedelo markiiba.

Si kastaba ha ahaatee xubnihii Apac (DDG) mowqifkoodii ayay ku adkaysteen. Muran badan ka dib, wuxuu Odbongo sheegay inay noqon karto khalad dhacay markii laga dhexaysiisay cagafta laba degmo.

Sam Ogenrworth, oo ah ku simaha xoghayaha guud ee Lira, wuxuu yiri cagaftu way ag tiilay Apac markay qaateen reer Lira.

**X/dhibaanka Deegaanku Markuu Yahay Gorgoriye**

Wuxuu sheegay in markii hore qaybta labaad ee ciidanka qaranku ka soo ergisteen Lira si ay wado saldhigooda tagta ugu dhisaan, ka dibna lagu soo celiyay maamulka degmada.

Hadda cagaftii waxaa shaqo lagaga hayaa kioga oo ka tirsan Degmada Lira, una qaabilsan dayactirka wadooyinka yaryar.
Orengrworht wuxuu sheegay in laba bilood ka hor xoghayaha degmada ee Apac, Mr, Apire uu kala hadlay arrimaha cagafta.

**Tababarka Hogaanka La Doortay**

"Waxaan ku idhi hadii aad u baahataan aniga ilaso xiriira, laakiin sidii aanu Ia kulanay dib ii la may soo xiriirin". Imika hadii cagaftu iska fadhido oo ay u baahanyihiin, ma jiro sabab aanu uga ceshanaa". Mr. Ogenrworth wuxuu tilmaamay mowqif kiisa ah inaanay isbixinayn haday cagaftu dhex meeraysato Lira iyo Apac todobaad walba, sababtoo ah kharashka sare ee makiinda cagafta.

Mr. Apire, oo gudoominayey shirka aya isku deyay inuu dejiyo carada xubnaha DDC ee Apac isagoo codsaday degenaansho.

Wuxuu balan qaaday in arinta lagu dhamayn doono qaab maamul mudo todobaad gudihii lagu qaban doon oo ay ka soo qaybgalaan wakiilo kakala socda labada Maamul (Authority)

**Aqoon is weydaarsi**

## Miko Odongo

Waxa tahay Ingineerka fulinta ee waaxda hawlaha guud ee ka mas'uulka ah Lira iyo Apac labadadaba, Go'aanka ah in ay sanadaan wadada wadaagaan labada Maamul waxa lagu keenay talo soo jeedintaadii. Wax ra'ayi ah kamaad haysan in wadaagida cagaftu faa'ido mooyee ay keeni karto xifaaltan iyo uur-xomo.

Waxaad rejaynaysay inay wakiilada labada maamul noqdeen macquul oo ay wada jir uga shaqeeyaan sidii xal loogu heli lahaa mushkilada. Hadii aanay waxba ka qaban karrin, adigaa diyaar u ah inaad soo jeedin bixiso aad ku joojinayso wadaagidda agabkan ama inaad qalabka u bedesho meel kale.

Waxad awood u leedahay inaad ku adkaysato cagafta markay Lira haysato. Waxa kugu adkaadey fekradaha aan macquulka ahayn ee saraakiisa APAC. Waxa loo sheegay inay kula soo xiriiraan mar allaale markay u baahdaan cagaftan. Markaa hadaanay cagaftu ku jirin shaqooyinka mashaariicda Lira. Waxa lagu soo dhawaynayaa inay soo doontaan.

Ha yeeshee waxaa ka door roon inaad qalabka siiso ugu yaraan sadex  bilood markiiba si looga maarmo qiimaha sare ee lagu gurayo agabka

Masuuliyada cagafta markay ka shaqeynayso Apac adigaa laguu dhibay. APAC waxay cagafta heshay mar keliya oo ay todobaad haysatay. Intii kale waxaa haysatay LIRA.

**X/dhibaanka Deegaanku Markuu Yahay Gorgoriye**

Waxaad asxaabtaada la qirsan tahay inay LIRA xuurto ku haysatay. Waxaa kaloo arinka sii xumeeye in mar kaliya ee ay dayactir heshay waxaa dayac tiray APAC.

**Tababarka Hogaanka La Doortay**

**Aqoon is weydaarsi**

## 7.4 LAYLI: LUUQADA WADAHADALKA

**Waqtiga loo baahanyahay: 120 daqiiqo**

**Ujeedo:**

In la xoojiyo qaabka isfahamka luqada gorgortanka iyo waxtarka ay u leedahay hogaamiyaasha la doortay ee dhaqamada kala duwan leh.

**Geedi-socod**

Qaybi liis ay ku yaalaan habab caan ah iyo oraahyo ay isticmaaleen gorgortamayaal waayo arag ah oo kala jooga meelaha kala duwan ee dunida. (liistada waxaa laga heli karaa boga danbe).

Ka qayb galayaasha ha akhriyeen farsamooyinka iyo oraayaha oo ha ka jawaabeen su'aalo dhowr ah oo ku saabsan mid waliba sida ay ula xiriiraan hawlaha gorgortame ee goobaha shaqo. Uqaybi ka qayb galayaasha qaybo yar yay oo mid waliba shan ilaa todaba ka koobanyahay, waydii inay farsamooyinkan iyo oraahahan faa'ido uleeyihiiin. Dib u kulansii ka qayb galayaasha koox kasta oo waydii talooyin lakala xulan karo.

## FARSAMOOYINKA IYO ODHAAHAHA GORGORTAN GUUD

*Buugooda lala dhacay, sidee loo helaa*: Heshiis gorgorineed adiga oo aan isdhiibin, Fisher iyo Ury waxa ay isticmaalaan oraahda gorgortan anshax leh si loo faahfaahiyo hab gorgorineedkaas oo ah mid adag sidoo kale barax tiran waa dariiqo marka loo eego qorayaasha," ku tusaysa sida aad u heli lahayd waxa aad xaq u leedahay adiga oo aan is biyo dhiijin".

Hoos waxa ku muujisan tiro weero ah kuwaas oo gorgoriyayaashu ay ku isticmaali karaan si ay u helaaan waxa ay ka doonayaan qof kale iyagoon aan dhaawac u gaysan dareenkiisa iyo waxa uu qofkaasi doonaayo.

**Aqoon is weydaarsi**

1. **Fadlan i sax hadii aan khaldanahay,**
   Marka koox kale fooda lays daro si arrin taagan loo xaliyo, gorgoriyaha khibrada lehi wuxuu iska dhawrayaa hadalada ama debeecada keeni kara in dhinaca kale dareemo in halis la galiyay ama uu is difaac-galo. Tusaale ahaan, marka laga hadlaayo arin keeni karta khilaaf gorgoriyuhu wuxuu odhan karaa, "fadlan isax hadii aan khaldanahay". Weedhani gorgoriyuhu waxa uu malaysanayaa muuqaal qalbi furnaan ah oo soo jiidasho keeni kara iyo in loo tix galiyo filashadiisa ah suurtagalnimada inuu dhinac kale ku khaldami karo.

   **Su'aal?...**
   Tani ma tahay farsamo gorgortaneed ay isticmaali karaan xubnaha golaha deegaanka ee waddankaagu? Hadiii ay sidaa tahay, afkee/luuqadee ayaad ku isticmaali lahayd matan oo kale mise ka duwan? Hadii aanay sidaa ahayn hab-dhaqankee ama luuqadee ayaad u aqoonsan lahayd ta ugu waxtarka fiican.

   ______________________________________________________________________________
   ______________________________________________________________________________
   ______________________________________________________________________________

2. **Ma ku weydiin karaa dhawr su'aalood?**
   Oraahyada dhabta ahi dad bay handadaad ku noqon karaan. su;aaluhu, dhinac kale hadaa ka fiirino, waxay suuro galiyaan wada hadal iyo in khaladaad laysla saxo intii suuro gal ah. Hadii la yiraahdo "maku waydiin karaa dhowr su'aalood si aan u hubiyo in tabashooyhinkaygu ay run yihiin?" gorgoriyaha khibrada lehi dadku waa u uu fududeeyaa arimaha, waxa uu siiyaa muuqaal ah in oo qalbi furnaado iyo inay suurto gal tahay in wararka lahayaa noqon kaaan kuwa khaldan.

   **Su'aal?...**

   Farsamadan gorgronineed ma isticmaali karaan xubnaha golaha deegaanka ee wadankaagu? Hadii ay sidaa tahay afkee/luuqadee ayaad ku isticmaali lahayd? Ma tan mise mid kale oo ka duwan? Hadii aanay sidaas ahayn habdhaqankee ama luuqadee ayaad u aqoonsan lahayd ta ugu waxtarka fiican.

   ______________________________________________________________________________
   ______________________________________________________________________________
   ______________________________________________________________________________

**X/dhibaanka Deegaanku Markuu Yahay Gorgoriye**

**Tababarka Hogaanka La Doortay**

**Aqoon is weydaarsi**

3. **Aan hubsado in aan fahmay…..**

Inta badan dhinacyada arin ka gorgotamayaa waxa ay qaataan mowqif ku dhisan xog khaldan ama aan dhamaystirnayn. (tusaale waxa ay u malaynayeen in dhinac kale yiri ama waxa ay u malaynayeen in dhinaca kale u jeeday markii ay sidaas ama hadlakaas lahaayeen). Gorgoriyaha khibrada lehi waxa uu bartay inuu hubiyo wixii la yiri ka hor intaanu qofka u bandhigin fikrad. Sidan waxaa loo sameeyaa iyada oo kalmad- kalmad loogu celinaayo wixii la maqlay. Erayada nuucaan ah “aan hubiyo hadii aan fahmay wixii aad tiri”, waxay ka hortagi karaan isfahama la’aan isla markaana waxaa ay muujin karaan daacadnimada gorgoriyaha ee isku dayay in uu isku xir sameeyo

**Su’aal?...**

Farsamadan gorgronineed ma isticmaali karaan xubnaha Golaha deegaanka ee wadankaagu? Hadii ay sidaa tahay afkee/luuqadee ayaad ku isticmaali lahayd? Ma tan mise mid kale oo ka duwan? Hadii aanay sidaas ahayn hab dhaqankee ama luuqadee ayaad u aqoonsan lahayd ta ugu waxtarka fiican.

________________________________________________________________________
________________________________________________________________________
_______________________________________________________________________

4. **Ii oggolow in aan ku tuso meesha ay dhibtu iga haysato…….**

Gorgoriyaasha khibrada lehi waxay sharxi doonaan meelaha wal-walku ka hayo ee ku jira-soo jeeddimaha dhinacyada kale kahor inta aan soo bandhigin soo jeedimahoooda tusaale, “ii ogolow in aan ku tuso meesha dhibtu iga haysato ee ku jirta soo jeedimaahaaga”. Waxaa loo isticmaalaa si uu gorgoriyuhu u muujiyo in uu diyaar u yahay in uu fikradiisa wax laga bedelo isla markaana in uu ku dhiiriyo dhinaca kale in ay dhagaystaan oo aanay muran ka hor keenin.

**Su’aal?...**

Farsamadan gorgronineed ma isticmaali karaan xubnaha Golaha deegaanka ee wadankaagu? Hadii ay sidaa tahay afkee/luuqadee ayaad ku isticmaali lahayd? Ma tan mise mid kale oo ka duwan? Hadii aanay sidaas ahayn habdhaqankee ama luuqadee ayaad u aqoonsan lahayd ta uguu waxtarka fiican.

________________________________________________________________________
________________________________________________________________________
_______________________________________________________________________

**Aqoon is weydaarsi**

5. **Xal aan dulmi ku jirin wuxuu noqon kara…………**
   Si uu u muujiyo debacsanaan isla markaana uu soo jeedin sugan usoo bandhigo. Gorgoriyaha khibrada lehi waxa uu oran karaa sidan,”xal aan dulmi ku jirin waxaa noqon kara…” gorgoriyuhu waxa uu markaa abuuri karaan muuqaal uu malaynayo in labada dhinacba faa’ido ugu jirto. Ujeedada gorgoriyuhu waxa weeye inuu soo bandhigo fikrad isagoon u muuqanayn mid ku adag ama aan u xaglineyn dhinac kale.

   **Su’aal?...**

   Farsamadan gorgronineed ma isticmaali karaan xubnaha Golaha deegaanka ee wadankaagu? Hadii ay sidaa tahay afkee/luuqadee ayaad ku isticmaali lahayd? Ma tan mise mid kale oo ka duwan? Hadii aanay sidaas ahayn habdhaqankee ama luuqadee ayaad u aqoonsan lahayd ta uguu waxtarka fiican.

   ______________________________________________________________________________
   ______________________________________________________________________________
   _____________________________________________________________________________

6. **Hadii aynu isku raacno…..Hadii aynu isku khilaafno**
   Ujeedada gorgoriyaha khibdrada lehi waxa weeye inuu fududeeyo intii suuro gal ah in dhinaca kale ogoloaansho keeno. Istaraariijiyad faa’ido leh oo taas lagu fulin karaa waxa weeye in gorgoriyuhu tilmaamo faa’idooyinka laga helayo heshiis uu soo bandhigay hadii dhinaca kale ogolaado iyo cirib xumada ka dhalayanaysa hadii lagu guul daraysto in heshiis la gaaro. Gorgoriyuhu waxa uu hadalka u dhigayaa inay dhici karto in gorgortanka lagu guul daraysan karo, hasayeeshee wuxu raacinayaa dareen ah inuu ku kalsoon yahay in heshiis la gaari karo.

**Su’aal?...**

Farsamadan gorgronineed ma isticmaali karaan xubnaha Golaha deegaanka ee wadankaagu? Hadii ay sidaa tahay afkee/luuqadee ayaad ku isticmaali lahayd? Ma tan mise mid kale oo ka duwan? Hadii aanay sidaas ahayn habdhaqankee ama luuqadee ayaad u aqoonsan lahayd ta uguu waxtarka fiican.

______________________________________________________________________________
______________________________________________________________________________
_____________________________________________________________________________

**<u>Xusuusin qoraha ka timid:</u>**

Oraahda keydka ah ee layliska hore waxa uu ka yimid cutubka 2 ee Fisher iyo Rogar and Ury, William Greating to yes. Heshiis gorgorineed adigoon is dhiibin taas oo ah qoraal loo bogay oo ku saabsan gorgorinta wax ku oolka ah. Waana xubinta u horeysa ee qormada barahani ku bilaabanto.

**Aqoon is weydaarsi**

# 7.5 DOOR JILID/DARAASAD XAALADEED: KHILAAF U DHEXEEYA BACADLAHA IYO GOLAHA DEEGAANKA

## Waqtiga loo baahanyahay: 120 daqiiqo

## Ujeedo:

In la siiyo ka qayb-galayaasha fursad ay ku hirgaliyaan xirfadiha anshaxa gorgortanka ay barteen ( sidii layliyadii hore kusoo aragnay ama ku jiro qoraalka hore loogu xusay bare-tilmaamahan), iyo in la helo hab danwadaag ku yahiin/isku raacsanyahiin Golaha Deegaanka si ay u helaan waxa ay rabaan, iyadoo aan la wiiqeeyn ama aan la dhaawaceyn xiriirka ka dhaxeeya kooxaha awooda badan ee bulshada.

## Geedi-socod

U sheeg ka qayb galayaasha in ay ka qaybqaataan door jilida daraasada xaaladeed oo dariiqyada magaalada lagaga nadiifiyo bacadlayaasha, inta ay joogaan ergada ka qayb qaadanaysa shirka caalamiga ah ee socda. Weydii lix ilaa sideed mutadawac in ay ka qayb galaan leylis jilis ah usharax in kala bar mutadawaciintu ka mid ah ay jilaan doorka golaha deegaanka, kala barka kalena ay jilaaan doorka bacadlayaasha oo ah koox firfircoon habaysan ilsa markaana mintid ah u tilmaan mutadawac kasta doorka uu ka qaadanayo. Ka qaybgalayaasha aan iyagu doorna qaadanayn waxaa la weydiisanayaa in ay ugu qayb galaan sidii muwaadiniin goob joogayaal u ah gorgortan ka dhexeeya labada kooxood.

**X/dhibaanka Deegaanku Markuu Yahay Gorgoriye**

Sii koox kastaa faahfaahin ku saabsan hawsha (hoos fiiri ) iyo labada door oo iskasoo hor jeeda (fiiri hagaha tababaraha). U sharax in ujeedada goluhu yahay in bacadlayaasha lagula gorgortamo heshiis xakamaynaya in dariiqyadu xirmaan ka hor iyo kadib inta shirku socdaba. Dhinaca kale bacadlayaashu waxaa ay doonayaan inay kaa fa'idaan dhaqaale ahaan iyo in ay helaan goob sayladeed oo ka qayb galayaasha shirkuna si xor ah uga iibsadaaan.

Sii labada kooxood ilaa 30 daqiiqo si ay u akhriyaan oo uga doodaan xaalada isla markaana u go'aansadaan istaraariijiyad ay waxay doonayaaan ku helaan. **Xusuus.** Toosin/dheraad ah ayay kooxda goluhu uga baahan tahay tababaraha si ay ula yimaadaan gorgortan anshax leh, taasina waxay wax ku kordhin doontaa qiimaha wax barashada ka qayb galayaasha ee layliskan.

**Tababarka Hogaanka La Doortay**

Inta labada kooxood falanqaynta wadaan waxaad ka qaybgalayaasha soo haray u dirtaa inay kuraasta iyo miisaska u salaxaan fadhi lagu gorgortamayo (sid hoos ku sawiran). Sodon daqiiqo ka dib labada kooxood dib shir ugu fur si ay layliga u bilaabaan.

**Aqoon is weydaarsi**

## Qaabka fadhiga gorgortansiiyaasha iyo Goob joogayaasha

Wada fadhiisi miiska gorgortanka wakiilada lasoo doortay ee labada kooxood, fadhiisi meel ku dul wareegsan miiska gorgortanka Kuwa ka socda labada kooxood een iyagu ka qayb galayn una sheeg gorgortmayaasha in heshiis ku gadaan mudo 20 daqiiqo ah. Waqti yar kulan isugu yeer kuna hogaami dood kooxeed ku saabsan su'aalahan soo socda.

### Su'aal: 1

Waa maxay tilmaamaha gorgortanka anshaxa leh ee ay isticmaaleen si ay ula gaareen heshii bacadlayaasha? intee lagu guulaysan karaa?

### Su'aal: 2

Sideebay kuugu muuqataa inaad ka mid noqoto koox istaraatiiji ahaan u isticmaasha gorgortanka anshaxa leh si loo gaaro heshiis?

### Su'aal: 3

Sideebay kuugu muuqataa inaad lamacaamiisho dad istaraatiiji ahaan u isticmaalaha gorgortanka anshaxa leh?

### Su'aal: 4

Xaaladahee ayuu golehiinu isticmaali karaan gorgortanka anshaxa leh

**X/dhibaanka Deegaanku Markuu Yahay Gorgoriye**

**Tababarka Hogaanka La Doortay**

## KHILAAFAADKA U DHEXEEYA BACADLAYAASHA IYO GOLAHA DEEGAANKA

### Xaalada

Magaalada Khula ayaa urur muhiim ah oo caalami ahi u doortay inuu ku qabto shir sanadeedkiisa iyo carwo. Doorashada loo doortay Khula in lagu qabto shirka ayaa muhiimad u lahayd beesha ganacsatada ah oo uu dhaqaalahoodu cakirnaa dad tiro badan oo ah ka qaybgalayaasha ayaa buuxin doona Khula hoteeladeeda, maqaaxiyaheeda iyo meheradaha kaleba. Kuwaas oo kor uqaadi doona mudada ay joogaan. Hogaamiyayaasha magaalada ayaa aad uga soo shaqeeyay sidii shirkaas loogu qaban lahaa Khula waxayna rabeen in dhacdada laga dhigo mid aan hore loo arag si ay taasi udhiiri galiso in makale lagu soo celiyo shirkan.

**Aqoon is weydaarsi**

Caqabadaha qura ee ishortaagi kara in uu shirkani guulaysto waa khilaaf ka dhex dhaca hogaamiyayaasha magaalada iyo bacadlayaasha. Kuwaas oo iibiya waxay soo saaraan guryaha yar yay ee ku yaala dhinacyada wadooyinka iyo gawaarida awrta jiida inkastoo ay ka jiraan buuq iyo jaah wareer wadooyinka magaalada hadana bacadluhu waa qaybta ugu muhiimsan ee dhaqaalaha kabta, waxay u habaysan yihiin si hagaagsan oo wanaajinaysa danahooda wada jirka ah.

## MOWQIFKA GOLAHA DEEGAANKA IYO DAWLADA HOOSE

Sharaxa mowqifka golaha deegaanka iyo dowlaha hoose Trainers, guide elected leadership (tababare hagaha lagu tababaro hogaanka la doortay )

**X/dhibaanka Deegaanku Markuu Yahay Gorgoriye**

**Tababarka Hogaanka La Doortay**

**Aqoon is weydaarsi**

## 7.6 LAYLIGA XIRFAD GUDBINTA

### Waqtiga loo baahanyahay: 30 Ilaa 40 daqiiqo

Layligani waa inuu ka qayb galayaasha ka caawiyaa gudbinta khibrada barashada ee tababarka si ay ugu adeegsadaan hawlahooda dhabta ah ee madax ahaan loogu doortay wuxuu layligani diirada saarayaa kor uqaadidia rajooyinka samaynta qorshaynta dhabta ah iyo balan qaadyada wax qabasho ee qof ahaaneed hawsha badideeda waxaa lagu qabanayaa shaqsinimo qaarna waxa lgu qabanayaa wada shaqayn.

***Garashada iyo qabashada waxa u dhexeeeya kala-duwanaan balaadhan***

Guud ahaan waxaa laysku waafaqay in ujeedada tababarku yahay in la hormariyo sida ay dadku wax u qabsadaan iyadoo la tusayo si ka fiican sidii ay iyagu wax u qabsanayeen. Xaqiiqadii guusha waayo araga tababarka waxaa lagu cabiraa xadiga koritaanka qofnimo iyo isbedelka dhaca xiliga uu tababarku socdo iyo markuu dhamaadaba.

Tababarku inyar buu raad ku sameeyaa ka qayb galayaasha aqoon iswaydaarsiga. Tababarku marmarbuu raad u leeyahay ka qayb galayaasha aqoon iswaydaarsiga khaas ahaan marka ay kujiraan saacado yar.

Farxadii wakhtigii tababarka ayaa dhakhso u baaba'ada markaas ayuu ka qaybgaluhu dhibaato kala kulmaa shaqadiisii hore iyo isku dhac kaga yimaada dadkii ay hore uwada shaqaynayeen ee aan iyagu kala qayb qaadan aqoon iswaydaarsiga.

**X/dhibaanka Deegaanku Markuu Yahay Gorgoriye**

Balan qaadyada barashada iyo isbedelka la sameeyey waqtiga xiritaanka tababarka ayaa waxay ka qaybgalaha ka caaawinaysaa inay gudbaan caqabadaha ka hor imaanaya iyo deegaanka shaqadiisa. tababaruhu wuxuu ka caawiyaaa mudada ay ka qaybgalayaasha kala guurka ku jiraan ee ay ka guurayaan waxbarashada ee ay uguurayaan wax qabashada. Uga fikir sidatan wakhtiga lagu qaato dhiiri galinta xirfad gudbintu wuxuu noqon karaa farqiga u dhexeeya fikrado xiiso leh oo lagu soo bandhigo iyo waayo aragnimada nolosha bedala.

**Tababarka Hogaanka La Doortay**

### Geedi-socod

Ku qaado ugu yaraan nus saac aqoon iswaydaarsiga inaad ku jihayso dareenka ka qayb galayaasha muhiimada waxbarashada, kuna dhiiri gali in ay waxa ay barteen ku sii tijaabiyaan wax qabadyada golahooda.

**Aqoon is weydaarsi**

Bilow inaad ka qayb galayaasha siiso ilaa 15 daqiiqo oo ay keli keli uga jawaabaan weydiimo qoran oo ku saabsan gudbinta wixii la baray.

Marka ka qayb galayaashu dhamasytaan weydiimaha qoran ka codso inay ka qayb galayaashu kala sheekaystaan kooxaha labaad iyo sadexaad waxyaabo ay isleeyihiin si iayaga ka duwan ayaad uqaban kartaan.

**X/dhibaanka Deegaanku Markuu Yahay Gorgoriye**

**Tababarka Hogaanka La Doortay**

**Aqoon is weydaarsi**

**X/dhibaanka Deegaanku Markuu Yahay Gorgoriye**

**Tababarka Hogaanka La Doortay**

# WAYDIIMO QORAN OO KU SAABSAN GUDBINTA WAXA LA BARTO

Qadar daqiiqado ah ka fikir doorka gorgoriyaha iyo afkaarta cusub ee aad aqoon isweydaarsiga ka kororsatay. Intaa ka dib ku qor meelaha banaan kalmad ama laba aad kaga hadlayso wax xiiso leh oo aad naftaaada ka baratay

____________________________________________________________________

____________________________________________________________________

____________________________________________________________________

Adiga oo ku xisaabtamaya waxa aad naftaada ka baratay iyo siyaabaha is bedel loo samayn karo ee aad aqoon iswaydaarsiga ka baratay, waa maxay sababaha aad isleedahay si ka duwan Ayaad usamayn kartaa?

1. __________________________________________________________
2. __________________________________________________________
3. __________________________________________________________

Ugu danbayn waxa caqabad ah ee aad isleedahay ama naftaaada ama jawiga shaqadaada ayay kaaga iman karaan marka is bedelka marka aad rabto inaad isbedel dhaqan geliso. Maxaad u baahan tahay in aad samayso si aad caqabadaha iskaga hor qaado?

1. __________________________________________________________
2. __________________________________________________________
3. __________________________________________________________

Ugu danbayntii waa maxay caqabadaha shakhsi ahaantaadu ama deegaanka shaqadaadu ee aad rajaynayso in aad ku waayo aragto xiliga aad hirgalinayso? Maxaad qaban doontaa si aad u baabi'iso ama aad u yarayso caqabadahaas.

| **Caqabadaha** | **Sida looga bixi karo** |
|---|---|
| 1. ________________ | 1.________________________ |
| 2. ________________ | 2.________________________ |
| 3. ________________ | 3.________________________ |

*Hadii aad baran karto waad qaban kartaa*